



---

# Kaluumaysi wakhti dheer jira:

Buug-yaraha ku tusaya hab dhaqan  
jiritaan waara

---





Maxay kalluumaysatada Soomaaliyeed samayn karaan si ay u xaqiijiyaan mustaqbal barwaaqo ah? Isticmaalida shabagyo leh cabbir daloolo oo waaweyn, kala soocida kalluumada ay soo qabsadeen iyo dib u celinta kalluumada yaryar ayaa ka caawin doona kalluunka inuu kobco.


Soo jeedintii Ciera Villegas iyo Paige Roberts, Sawirada waxa sameysay Molly Wilson

Mahadnaq gaar ah Liz Allen, Alexandra Amling, Jamal Xasan iyo Axmed-Yasin Cusmaan Moge



Qoyska arigoosatada ayaa wada lugeeya sagxada bada Soomaaliyeed. Dhamaan agagaarkooda, biyaha waxa ka buuxa kalluun kala duwan oo ay ku jiraan gacash, yuumbi, dhuubaani, saanfiid iyo sanuuro. Sagxada iyo deegaanka badweyntu waa mid firfircoon oo caafimaad leh. Mustaqbalka badweyntan caafimaadka qabtaa waxay ku xiran tahay kalluumaysatada...

Sida cad, kalluumeysatadu waxay ka shaqeynayaan inay qabtaan kalluunka si ay u suuqgeeyaan. Kalluumaystadu waxay isticmaalaan shabagyo soo qabta **wax walba**, xitaa kalluunka ugu yar.




Sida cad, kalluumeysatadu waxay ka shaqeynayaan inay qabtaan kalluunka si ay u suuqgeeyaan. Kalluunka iyo arigoosatada ayaa dhamaantood lagu qabtay shabaga, laakiin waqtigan waa ay ka duwan tahay. Kalluumaysatadu waxay isticmaalayaan shabagyo **cabbirka dalooladoodu uu waaweyn yahay** si loogu ogolaado **Kalluunka yaryar inuu baxsado**.



Waxay qabtaan oo ay qaataan dhamaan kalluunada iyo arigoosatooyinka soo raaca shabagyadooda. Arigoosatooyinka yaryar waligood ma awoodaan inay yeeshaan qoys u gaar ah iyaga.




Intii uu qaadan lahaa arigoosatada yaryar iyo kalluunka yaryar si looga iibiyo suuqa, kalluumeystahu **wuxuu cabbiraa dhererka** kalluun iyo arigoosato kasta. Waxa uu arkaa in qaar ay aad u yaryar yihiin **waxaanuu kalluunka iyo arigoosatada yaryar dib ugu sii daayaa** badweynta si ay ula joogaan qoysaskooda.




Wuxuu ogyahay inuu ku soo laaban doono maalin kale si uu u qabsado iyagoo waaweyn.

## Dhowr Sanno Kadib




Sannado badan kadib, **Kalluumaystayaal badan ayaa buux dhaafiyay** biyaha, iyagoo ururinaya kalluuno aad iyo aad u yaryar. Arigoosatada cidlowday ayaa dhex lugeysa badda, iyadoo la yaaban meesha ay aadeen dhamaan arigoosatooyinkii iyo kalluunadii yaryaraa.

## Sannado Badan Kadib




50 sanno kadib, kalluumaysatada iyo doonyaha **ayaa ka batay kalluunka**. Marka ay kalluumeysatadu u tartamaan una dagaalamaan si ay u qabtaan kalluunkii ugu dambeeyay, tartanka ayaa ah mid daran oo rabshad leh.

## Dhowr Sanno Kadib



Sannado badan kadib, kalluumaystayaal badan ayaa soo biiray, laakiin cabbirka daloolka shabagooda ayaa weyn, taas oo u oggolaanaya xayawaanka yaryar inay baxsadaan. **Kalluunkii yaryaraa ayaa weynaaday** oo kordhiyay tirada kalluunka ee badda ku jirta.

## Sannado Badan Kadib



50 sanno kadib, xeebaha Soomaaliya waxa **ka buuxa kalluun**. Deegaanku waa mid firfircoon oo caafimaad leh. Kalluumaysatadu uma baahna inay ku dagaallamaan kalluunka ugu dambeeya.

# SUUQA KALUUNKA

WAA  
XIRANYAHAY  
KALUUN MA JIRO




Kalluumaystadu waxay luminayaan qalabkooda iyo doomahooda. Ma jiraan kalluun kale oo lagu iibiyo suuqyada qoysaskuna way gaajoonayaan.

# SUUQA KALUUNKA

WAA  
FURANYAHAY!



Waxay ka helaan **qime sare** kalluunka iyo arigoosatada waaweyn. Suuqa ayaa sii furnaan kara sannado badan oo kale. Qoysaska kalluumeysiga ayaa heysta lacag iyo cunto.



# ONE EARTH FUTURE

[oneearthfuture.org](http://oneearthfuture.org)



One Earth Future (OEF) is a self-funded, private operating foundation seeking to create a more peaceful world through collaborative, data-driven initiatives. OEF focuses on enhancing maritime cooperation, creating sustainable jobs in fragile economies and research which actively contributes to thought leadership on global issues. As an operating foundation, OEF provides strategic, financial and administrative support allowing its programs to focus deeply on complex problems and to create constructive alternatives to violent conflict.

# SECURE FISHERIES

[securefisheries.org](http://securefisheries.org)



Secure Fisheries is a program of One Earth Future. Secure Fisheries works with local, regional, and international stakeholders to strengthen fisheries governance, combat illegal fishing, and promote sustainability in fragile and post-conflict regions as a pathway towards greater peace and stability.



**SECURE FISHERIES**

Advancing Sustainable Fisheries

*a program of One Earth Future*

**one earth**  
**FUTURE**

*Peace Through Governance*